



**Camp Fire**  
MINNESOTA

## TANADOONA

**Ururyada Camp Fire... hadda is diiwaangeli... hal usbuuc oo dalxiis xagaa ah!**

**Degnaanshaha (habeenkii) Xarunta Dalxiiska**

Axad-Jimce | Da'da: 7-17 sano jir.

**Gaadiid waxaa laga siinayaa xarunta dalxiiska:**

Axad ayaa la qaadayaa;

Jimce ayaa guriga lagu soo celinayaa

**Waa maxay Xarunta Dalxiiska Tanadoona?**

Xarunta Dalxiiska ee Tanadoona waxaay canugaaga siinaysaa fursad uu ku barto oo uuna ula qabsado waxyaabaha dabiiciga ah iyo uu ka dhismo xagga isku kalsoonaanshaha iyo xornimada.

Dalxiisayaasha waxay joogayaan qolal magaalada ka baxsan, iyadoo samaysanaya saaxiibo cusub! Usbuuca waxaa lagu mashquulsan yahay isku dayitaanka ciyaaro cusub sida qaanso ku dagaallida, huuri raacidda, ciyaaridda dhammaan ciyaaraha xarunta laga helo, heesidda heesaha xarunta, u dubidda wax la cuno kuwa guulaysta iyo waxyaabo kale oo badan.

La taliyaasheena xarunta ku sugan waxay u tababaran yihiin inay xaqiijiyaan badbaadada xarunta iyo khibradda ciyaareed ee qof walba. Dad badan ayaa ka yimid dibadda Maraykanka!.

## Is diiwaangeli 1-da May

Ku soo celi foomka diiwaangelinta hoggaamiyahaaga ururkaaga Camp Fire 1-da May.

## Isu diyaarinta Dalxiiska

Dalxiisayaasha waxay u baahan yihiin boorsadda lagu seexo, toosh iyo jaakad roo-beed. Haddii aadan haysanin sheeyadan, u sheeg hoggaamiyayaashaada dalxiiska. Waxaan ku faraxsannahay inaan siino dalxiisayaasha marka ay imaadaan xarunta dalxiiska. Waxaan soo diri doonaa liiska isdiyaarinta oo buuxa marka aad is diiwaangeliso.

## Diiwaankaaga

Fadlan qor taariikhyada aad dooratay \_\_\_\_\_ iyo \_\_\_\_\_.



Nala soo xiriir

[camptanadoona.org](http://camptanadoona.org) | [facebook.com/tanadoona](https://facebook.com/tanadoona) | [Instagram: camptanadoona](https://instagram.com/camptanadoona)

email: [info@campfiremn.org](mailto:info@campfiremn.org) | phone: 612.235.7284

URURKA CAMP FIRE  
IYO CAAWIMAAD  
DHAQAAL

# Macluumaadka iyo Shuruudaha

## GAADIIDKA

**Dalxiisayaasha waxaa laga qaadi doonaa xaruntooda maalinta Axadda waxaa na lagu soo celinayaa guriyadoda maalinta Jimcaha.** Shaqaalaha Camp Fire ayaa kula soo xidhiidhi doona usbuucaada ka hor iyagoo kaala hadlaya waqtiyada lagu qaadi doono usbuucaasi. Qof weyn oo fasax u haysto waa inuu weheliyaa dalxiisahaaga si uu ugula kulmo shaqaalaha goobta gaadiidka labada maalmood.

## MACLUUMAAD KU SAABSAN SANDAQADDA AY LEEDAHAY XARUNTA

Dhammaan dalxiisayaasha waxay fursad u heli doonaan in ay ka iibsadaan cuntooyinka fudud iyo waxyaabo kale sandaqadda xarunta. Ururka Camp Fire wuxuu ugu ridi doonaa dalxiisayaasha akooitigooda kaydka \$5- waxaa bixinaysa Camp Fire waxayna ka mid tahay caawimaadda. Haddii aad jeceshahay inaad ku ridato in ka badan intaa akooitigaada nala soo xidhiidh.

## CAAWIMAAD DHAQAAL OO LOOGU TALAGALAY QOYSASKA URURADA

Camp Fire waxay siinaysaa caawimaad dhaqaale dhammaan ka qayb galayaasheena ururka. Qoysaska kale oo qaba baahi dhaqaale way ku jiraan iyagana. Kulmadeena way buuxsamayaan si dhaqsa ah; waxaan si xooggan ku dhiirigelinaynaa qoysaska inay isdiiwaangeliyaan waqti hore ugu dambayn 1-da May. Isdiiwaanglinta waxaa loo baahan yahay form dhameestiran oo loo dhiibayo hoggaamiyahaaga ururka.

## KULAMO DHEERAAD AH/ CAAWIMAAD DHAQAAL

Ka qayb gale urur walba waxaa la siinayaa hal kulan. Kulamo dheeraad ah ayaa la bixin doonaa markay fursado soo baxaan. Camp Fire ayaa la soo xidhiidhi doonto qoysaska haddii aan helno caawimaado dhaqaale oo dheeraad ah.

## WARQADHA CAAFIMAAD EE LOO BAAHAN YAHAY

Foomam caafimaad iyo warqado tallaaf ayaa dalxiise kasta loogaa baahan yahay si uu u xaadiro Tanadoona. Haddii ay jiraan wax su'aalo ah intaa aad buuxinaysan foomamkani ama aad rabto inaad ogaato sida lagu helo warqadaha tallaalka la soo xidhiidh Camp Fire.

## QORAAL KU SAABSAN HADAFKEENA

Camp Fire waa urur loo wada dhan yahay wuxuuna u furan yahay shaqsi walba ee ka tirsan bulshooyinka aan u adeegno. Waanu soo dhawaynaa caruurta, dhallinyarada iyo dadka waaweyn inagoo eegaynin midabka, diinta, heerka dhaqaale, naafanimada qofka, jinsiyadda qofka ama kala duwanaansho nooc walba ah. Waxaanu ka shaqaynaynaa inaanu qaabilno baahida gaarka ah ilaa iyo inta aan awoodno dhaqaale ahaan. Fadlan na soo ogaysii haddii aan kuula shaqayn karno qaabkan.

## SHURUUCDA BURINTA HESHIISKA

**Dhammaan wixi burburin heshiis ah waa in aan ku helnaa qoraal ama wicitaan telefoon ee Camp Fire adigoo soo wacaya 612-235-7284 ugu yaraan 14 bari ka hor bixitaankaaga dalxiis.** Haddadan jawaab helin waa inaad reebtaa fariin oo ka kooban magacaaga, magaca dalxiisaha iyo lambarka telefoonka si aan fariintaada uga soo jawaabno.



Camp Fire  
Light the fire within

NALAGA SOO XIDHIIDH

[camptanadoona.org](http://camptanadoona.org) | [facebook.com/tanadoona](https://facebook.com/tanadoona) | Instagram: [camptanadoona](https://www.instagram.com/camptanadoona)

email: [info@campfiremn.org](mailto:info@campfiremn.org) | phone: 612.235.7284